Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

AGING AND LONG-TERM SERVICES ADMINISTRATION (ALTSA)
DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)

Oggaysiiska Tallaabada Qorshaha Daryeel Bixiyaha Qofka Tababar / Shahaado

Individual Provider Planned Action Notice Training / Certification

TAARIIKHDA OGGEYSIISKA

MAGACA IYO CINWAANKA BIXIYAHA

Tallaabada La Qorsheeyay

Qaanuunka Maamulka Washington (WAC) Cutubka 388-71 waxaa ku qoran shuruudaha tababarka iyo/ama shahaadada lagama maarmaanka u ah si loogu qalmo in la shaqeeyo lacagna looga qaato dhinaca Maamulka Adeegaha Muddada-Dheer iyo Gaboobida (ALTSA) ama Maamulka Naafooyinka Koritaanka (DDA) maadaama aad tahay Daryeel bixiyaha Qofka / Shaqaalaha Daryeelka Muddada Dheer.

Midaan waxay tahay in laguugu wargeliyo in dhaqan galka , Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) ama Meesha Wakaalada Gaboobida (AAA) ay tahay:

- ☐ Mid diidaysa / joojinaysa lacag bixinta adiga laguu siinayo sida Daryeel Bixiyaha Qofka;
- ☐ Qaadashada tallaabadaha lagu joojinayo Qandaraaskaaga Adeega Macamiilka Daryeel Bixiyaha Qofka.

Adigu laguuma oggola in aad u shaqaysid sida Daryeel Bixiyaha Qofka Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshadana kuma siin doonto wax lacag ah oo ku saabsan saacadaha aad shaqaysay marka ay tahay ama kadib taariikhda dhaqan galka kor ku qoran haddii aadan kasoo bixin shuruudahaaga tababarka/shahaadada taariikhda loo baahanyahay. Waxaa dhici karta in aadan ugu shaqaynin Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada lacag markale illaa aad kasoo baxdid tababarka/shahaadada loo baahanyahay *oona* lagaaga oggolaado dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ama AAA in aad sidaas samaysid.

Macaamiisha Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee aad u shaqaysid waa lagu wargelin doonaa haddii aadan kasoo bixin tababarka/shahaadada loo baahanyahay wakhtiga loogu talogalay, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada kuguma siinayso wax lacag ah adeegahaaga aad bixisid marka ay tahay ama kadib taariikhda dhaqan galka asaga/ayadana waxay raadsan doonaan daryeel bixiye kale.

Adigu ma awoodi doontid in aad shaqaysid sababtoo ah adiga:

- ☐ Lagaama siinin shahaado dhinaca Waaxda Caafimaadka (DOH) si aad ugu shaqaysid caawiye daryeel wakhtiga loo baahanyahay;
- ☐ Ma aadan uga oo bixin tababarka loo baahanyahay gudaha wakhtigii loogu talogalay sida kusalaysan macluumaadka ka ahaaday dhinaca Iskaashiga Tababarka. Tababarka loo baahanyahay ee aadan qaadanin wuxuu yahay:
  - ☐ Tababarka Aasaasiga ah;
  - ☐ Waxbarashada Joogtada ah.
- ☐ In aadan ahayn Caawiye Daryeel Guri ama shaqaalayaal kale oo u qalma oo ka ahaaday dhinaca-Waaxda Caafimaadka kuwaas oo ah kuwo shaqeeya oona xaalad wanaagsan.

Tallaabadan waxaa laga qaaday maamul kasta oo soo socda:

Sharciyada la xiriira shuruudaha looga baahanyahay tababarka iyo shahaadada ee daryeel bixiyayaasha qofka/shaqaalayaasha Daryeelka Muddada-Dheer waxaa laga helayaa gudaha WAC 388-71-0500 tooska WAC 388-71-1130. Daliiladaan labada ah ee soo socda ayaa laga yaabaa in ay muhiim kuu yihiin:

Sharciyada Guud (oo sharaxaad ka bixinaya qofka laga doonayo in la tababaro ama shahaado qaato, ka-cafinada, dukumeentiyada la isaga baahan yahay, iwm.): WAC 388-71-0500; WAC 388-71-0520; WAC 388-71-0540; WAC 388-71-0551; WAC 388-71-0561; WAC 388-71-0836; WAC 388-71-0975 iyo WAC 388-71-0523

Shuruudaha Tababarka Aasaasiga ah: WAC 388-71-0870; WAC 388-71-0875; WAC 388-71-0880; WAC 388-71-0885; WAC 388-71-0890, WAC 388-71-0895,; WAC 388-71-0931 iyo WAC 388-71-0932

Shuruudaha Waxbarashada Joogtada Ah: WAC 388-71-0985, WAC 388-71-0990, WAC 388-71-0991 iyo WAC 388-71-1001

Shuruudaha Shahaado Qaadashada: WAC 388-71-0973, WAC 246-12-030, iyo RCW 18.88B.021(1)-(2)

Maamulka Xuquuqda Dhageysiga Dacwad: WAC 388-71-0561

Xuquuqahaaga Rafcaanka

Waxaad xaq u leedahay in aad ka raadsatid maamulka dhagaysiga dacwada dhinaca WAC 388-71-0561. Waxaa dhici karta in aadan kahor imaanin tallaabo ay qaadatay Waaxda Caafimaadka midaas oo saamaynaysa shahaado qaadashadaada. Tallaabooyinka ay qaadato Waaxda Caafimaadka waa in looga hor imaadaan tooska rafcaan lagu sameeyo Waaxda Caafimaadka.

Waxaad leedahay xuquuqahan soo socda:

- In aad heshid nuqulyada dhammaan xogta ay isticmaashay ALTSA ama DDA si ay u gaarto go'ankeeda;
- In aad soo gudbisid dukumeentiyada caddeynta;
- In aad markhaati furtid xilliga dhageysiga iyo in aad keentid markhaatiyo adiga ku matalaya oo kuu markhaati fura; iyo
- In aad heshid fursad aad su'aalo ku waydiinaysid markhaatiyaasha u markhaati furaya waaxda.

Waxaad haysataa 30 maalmood kalandarka ah laga bilaabo taariikhda dhaqan galka ee ku qoran oggaysiiskan si aad rafcaan ugu samaysid tallaabadan. Si aad u codsatid dhagaysiga maamuleed, waxaa khasab kugu ah in aad usoo dirtid, usoo gudbisid, ama faakis ugu soo dirtid codsi qoran dhinaca Xafiiska Dhagaysiyada Maamuleed (OAH). Xafiiska Dhagaysiyada Maamuleed waa in uu ku helaa codsiga qoran gudaha 30 maalmood kalandarka ah ee ah taariikhda dhaqan galka ah ee ku qoran oggaysiiskan. Foom loogu talagalay codsashada dhageysiga dacwada maamulka la xiriirta ayaa lagu soo daray.

Qofka Laga yaabo in aad la xiriirtid si aad xog uga heshid

MAGACA	LAMBARKA TELEEFOONKA
XAFIISKA	WAKAALADA ☐ AAA ☐ DDA ☐ HCS

Nuqul ku jira Faylka Bixiyaha.

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

AGING AND LONG-TERM SERVICES ADMINISTRATION (ALTSA)

Codsi loogu talagalay Dhageysiga Dacwada

Request for Hearing

Cutub Kasta 388-526 ee loogu talogalay xeerarka dhagaysiga dacwada ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada

Ku dir codsigaaga cinwaankan: OFFICE OF ADMINISTRATIVE HEARINGS (OAH) PO BOX 42489 OLYMPIA WA 98504-2489	**AMA**	Faakis ahaan ugu dir lambarkan: (360) 586-6563

Waxaan codsanayaa dhageysi sababtoo ah waxaan rabaa in aan ka hor imaado go'aankan soo socda oo uu gaaray Maamulka Taageerada Daryeelka Muddada Dheer iyo Gaboobida (ALTSA).

Dooro mid kamid ah kuwaan soo socda:

ALTSA ama DDA waxay:

- ☐ Diidayaan / joojinayaan lacag bixinta aniga la ii siiyo sida ahaanshahayga Daryeel Bixiyaha Qofka;
- ☐ Qaadanayaan tallaabooyinka lagu joojinayo Qandaraaskayga Adeega Macamiilka ee Daryeel Bixiyaha Qofka.

Maadaama Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ay i joojisay anigu:

- ☐ La igama siinin shahaado dhinaca Waaxda Caafimaadka in aan ahay caawiye daryeel guriga ah gudaha wakhtiga loogu baahanyahay;
- ☐ Ugama soo bixin shuruuda tababarka gudaha wakhtigii loogu baahnaa sida kusalaysan macluumaadka ka ahaaday dhinaca Iskaashiga Tababarka;
- ☐ Ma haysto shahaado Caawiyaha Daryeelka Guriga ah ama mid u dhiganta midaas oo ay isiiso Waaxda Caafimaadka midaas oo shaqaynaysa oona ku sugan xaalad wanaagsan.

KUQOR HALKAN MAGACAAGA

LAMBARKAAGA TELEEFOONKA	LAMBARKA DARYEEL BIXIYAHAAGA	XAFIISKA AAD KA HESHAY OGGAYSIISKAN: ☐ AAA ☐ DDA ☐ HCS

QOR CINWAANKAAGA	MAGAALADA	GOBOLKA	FURAHA DEEGAANKA

Haddii aad haysatid wakiil

Waxaa i matalaya (haddii aad doonaysid in aad matashid adiga nafsadaada, ha buuxinin labada sadar ee soo socda):

HALKAN KU QOR MAGACA WAKIILKAAGA	HALKAN KU QOR LAMBARKA TELEEFOONKA WAKIILKAAGA

CINWAANKA	MAGAALADA	GOBOLKA	FURAHA DEEGAANKA

Haddii aad leedahay baahiyo deegaan

Ma u baahantahay turjumaan ama taageero kale oo dhageysiga ah? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay haa tahay, waa maxay luuqada ama taageerada aad u baahantahay?